


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Butros iyo Xoogga
Ducada



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.





Rasuul Butros wuxuu socdaal ugu baxay waddanka oo idil si uu dadweynaha ugu soo sheego waxyaabaha ku saabsan Ciise. Maalin baa, isagoo maraya magaalo la yiraahdo Ludda, ayuu la kulmay nin sariir saaran, curyaan buu ahaa.





Siddeed sanadood sariir saarnaa. "Ciise Masiix baa ku bogsiinaya adiga," Butros baa sidaa ku yidhi. "Kac oo sariirtaada gogol." Oo markiiba ninkii wuu kacay. Dadkii arkay tani waxay u soo noqdeen Rabbiga.





Magaaladii u dhaweyd ee
Yaafaa dadkii aad bay
tiiraanyasnaayeen. Naag
Masiixiyad ah oo la odhan
jiray Dorkas ayaa dhimatay.





Si murugo leh, saaxiibadeed
waxay u diyaariyeen in
maydkeeda la xabaalo,
deedna waxay dhigeen
qoladdii sare oo ahayd
meeshii oo wey murgoonayeen.



Laakiinse Dorkas
saaxiibadeeda waxay
maqleen inuu Butros ka
aga dhowyahay meesha
ay joogaan. Waxayna u
yeedheen Butros inuu
yimaado iminka Yaafaa.




Kolkii uu yimidna
carmaladii waxay tuseen
isaga garbagaliyaashii
iyo dharkii samaysay
inay la joogi jirtay
iyaga. Qofwalbana
wuu ooyay.



Laakiinse Butros dhamaantood dibadda ayuu u saaray, markaasuu jilba joogsaday oo duceeyey. Oo intuu meydkaa xaggiisa u soo jeestay ayuu yidhi, "Dorkas kac." Oo markaasay indhihii kala qaaday; oo markay Butros aragtay wey fadhiisatay.





Kolkaas dabadeed,
markaasuu gacanta
siiyey oo kiciyey, oo
markuu u yeeray
qudduusiintii iyo
carmaaladiiba,
iyada oo nool ayuu
hortaagay. Taasna
waa laga wada ogaaday
Yaafaa oo dhan;
kuwa bandanna waa
rumeysteen Rabbiga.



Butros wuxuu la joogay maalmo badan Yaafaa,
guri badda dhinaceeda ku yaalay. Maalin
maalmaha ka mid ah Butros wuxuu
fuulay guriga dushiisa si uu ugu

tukado. Haddii uu eegay
gidaarada magaalada,



waxa laga yaabaa
inuu arkay saddex
nin oo socotada ah
oo u imanaya inuu
isaga helo.



Nimankan waxay ahaayeen shaqaalihii sarkaal
ka mid ahaa ciidankii Roomaanka oo lagu
magacaabi jiray Korneeliyos oo ahaa nin Ilaah
caabuda.



Korneelios wuxuu diray shaqaalihiisii iny u
yeeraan Butros sababta oo ah waxaa isaga
muuqaal ugu sheegay malaa'ig. Butros buu u
diray, wuxuu



raadinayay
Simoon,
megdeeyihii
gurigiisa badda
dhinaceeda ku yiil.
Wuu idiin sheegi
doonnaa waxa
waajibaka idinku ah
inaad samaysaan.



Intii uu Butros ku tukanayay guriga dushiisa, Ilaah baa riyo u soo diray isaga. Wuxuu arkay wax u ek weel shiraaq weyn ah ku soo dagaya dhulka. Oo


waxaa ku jiray jinsi kasta oo xayawaan afara lugood leh

iyo waxa dhulka

guurguurta iyo haadda circa.




Butros wuxuu yidhi weligey ma cunin wax xaaraan ah. Taas oo la micne ah dadka diinta Yuhuudda haysta looma ogalayn inay cunaan. Markiiba, cod baa u yimid. "Kac Butros soo gowrac oo cun."




“Saas yannan noqon
Rabbiiyow!” Butros sidaa
Ilaah ku yidhi. “Weligey
ma aan cunin wax xaaraan
ah oo aan nadiif ahayn.
Mar labaad codkii baa u
yimid isagoo leh, Wixii
Ilaah nadiifiyey xaaraan
ha ka dhigin.” Taasina
waxay dhacday saddex
goor. Markiiba
weelkii waxaa loo
qaaday samada.



Butros ma uusanm fahmin waxa ay ahayd
riyadii uu arkay micnaheeda ahayd.
Wuuna ka fikirayay taa iyada ah waxay
ku saabsanayd. Ilaah baa ku yidhi
isaga saddex nin baa ku
doondoonaaya oo waa
inaad raacdaa iyaga.



Markii saddex nin u sheegeen Butros in Malaigta Rabbiga ku tidhi Korneeliyos cid u dir isaga. Ayuu gartay Butros in Ilaah halkaa ku hagayo isaga. Maalinti xigtay, isaga iyo lix kaloo saaxiibadii ah waxay aadeen Korneeliyos.





Laga yaabaaye, intii uu ku sii socday waddadii gurigii ninkii aan Yuhuudda ahayn, Butros wuxuu bilaabay inuu fahmo jacaylka uu Ilaah u qabo dadkiisa - In Ilaah doonayo quruumaha oo idil gartaan Ciise inuu yahay Badbaadiyaha dunida. Butros markii meeshii yimid, Korneeliyos lugihiisuu ku dhacay oo waa caabuday.



Laakiin Butros baa kiciyey Korneeliyos oo ku yidhi
"Istaag, aniga qudheyda nin baan ahaye." Deedna
dadkii guriga joogay oo idil wuxuu ku yidhi, ...



... "Idinka qudhiina waad ogtihiin inay xaaraan u tahay nin yuhuudi ah inuu ku darmado ama u dhowaado nin quruun kale ah. Hase ahaatee, Ilaah baa I tusay aniga inaan nina ku sheegin nin xaaraan ah ama aan nadiif ahayn."




Butros baa u sheegay dadkii aan Yuhuuda ahayn in Ciise Wiilka Ilaah uu ku dul dhintay iskutallaabta dusheeda oo haddana u soo sarakacay inuu badbaadiyo dunida. Deedna Ruuxa Qudduuska ayaa ku soo degay dadkii oo waxay bilaabeen inay Ilaah amaanaaan.



Butros iyo lix Yuhuuda oo saaxiibadii ahaa way la yaabeen. Waxayna u ekeyd sidii maalintii Bentekost. Haddiayddii Ruuxa Qudduuska ayaa ku soo shubantay dadkii aan Yuhuudda ahayn xitaa. Deedna Butros wuxuu ku Babtiisay magaca Ciise rumeystayaal cusub.



Yerusaalem dhexdeeda, Butros Masiixiyiintii baa ku canaantay inuu booqday dad aan Yuhuud ahayn. Haddaba Butros wuxuu u sheegay riyadii la tusay isaga iyo weliba aqbaliddii ducadii Korneeliyos in la yeelay. Markii taasi maqlayn waxyaalaha oo idil, Masiixiyiintii Yersuaalem way aamuseen. Oo waxay amaaneen oo maamuseen Ilaah, kuwii rumeystay, oo tukaday, waxaa la tusay Kaniisadda Masiixiyiinta in Ilaahn jecel yahay qof walba.



Butros iyo Xoogga Ducada

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Falimaha Rasuullada 9-12

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

